



The Royal Women's Hospital Women's Health Information

Endometriosis - macluumaad loogu talagalay dumarka

Maarso, 2004

Waa maxay endometriosis?

Endometriosis waa xaalad guud oo saameysa boqolkiiba toban dumar ah.

Waa xaalad uu unug, baadanaa ku jira ilmo galeenku laga helo meelo aan caadi ahayn oo jirka ah. Badanaa inkastoo, endometriosis laga helo lafaha miskaha. Tani waxay dhalin kartaa astaamo badan sida xanuun miskeed iyo madhaleysnimo.

Maxaa dhaliya?

Waxa sababa ee saxda ah ee endometriosis weli lama yaqaan. Hadalka ugu caamsan waxaa weeye inta caadadu ay ku hayso. Unuga caadadu wuxuu dhaafaa dib dib isagoo sii dhexmaraya tuunbooyinka fallopian tubes iyo lafaha miskaha dhexdooda halkaas oo ay ku dhegan tahay oo ku korto.

Endometriosis wuxuu u eg yahay inuu u socdo qoys qoys ahaan, markaa waxaa laga yaabaa inaad qabto haddii hooyadaa ama naag kale oo qoyskaaga ahi ay qabtay.

Side baa loo wiisateeyaa?

Dhakhtarka ayaa kaala hadli doona astaamahaaga oo sidoo kale sameyn doonaa baaritaan jireed. Tani waxay siinaysaa dhakhtarka macluumaad ku filan oo looga shakiyo inaad qabto endometriosis.

Haddii ay qof dumar ahi ku qabto endometriosis ugxaan sidaheeda sawirka ultrasound-ka ayaa laga yaabaa inuu muujiyo laakiinse had iyo jeer ma aha. Wiisateyn go'an ayaa la sameyn karaa oo keliya haddii aad haysato **laparoscopy** ama qaliin furan.

Laparoscopy waa nidaam, halkaas oo weyneeso yar lagaa gelinayo jeexdimo yar oo calooshaada ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan laparoscopy eeg warqada xaqiiqda ee Ku daaweynta Endometriosis iyadoo la isticmaalayo Laparoscopy (**Treating Endometriosis with Laparoscopy**).

Laparoscopy-gu wuxuu faa'iido u leeyahay wiisatada iyo weliba wuxuu caawiyaa inuu muujiyo inta khatarta endometriosis ay le'eeg tahay. Tani waxay sidoo kale caawineysaa dhakhtarku kuu qorsheeyo daaweynta ugu fiican.

Baaritaanka dhiiga ama in 'cad yar' lagaa gooyo si loo baaro ayaa la sameyn doonaa si loo xaqiijiyo wiisatada. Tani waa muhiim sababtoo ah mar marka qaarkood endometriosis waa lagu wareeri karaa xaalado kale oo jira awgood.

Ma jiraan hadda baritaano dhab ah oo ah endometriosis Australia gudaheeda.

Dhibaatooyinke ayey dhalin kartaa?

Dumarka badidiisu waxay qabaan endometriosis aan wax astaamo ah lahayn ama dhibaato laakiinse sidaan ma aha had iyo jeer.

Astaamaha caamka ah ee endometriosis waxaa ka mid ah:

- Xannuunka caadada
- Xannuunka marka lagu galmoonayo
- Xannuunka miskaha ee wakhtiyada kale ee wareega caadada
- Dhabar xannuun
- Tamar yari
- Xannuun leh socodka caloosha.

Dhammaan astaamahaan waxay leeyihiin astaamo kale oo dhalin kara oo suurto gal ah.

Dumarka qaarkii ay dhibi ka haysato uur qaadista waxaa la arkay inay qabaan endometriosis, xitaa iyagoon lahayn astaamo kale.

Sidee bay u saameysaa endometriosis uur qaadista?

Waxaa jira sababo badan oo dhaliya ma dhaleysnimada waxaana laga yaabaa inay jiraan wax ka badan hal sabab ah lammaane kastaa. Endometriosis waxaa laga heli karaa dumarka ay dhibka ka haysato inay uur qaadaan. Inta ugu yar ee dumarkan unug nabar ah oo uu sababay endometriosis ayaa sababi kara inay xirmaan tuunbooyinka Falloopianku.

Si kastaba ha ahaatee, dumarka badidooda ma cadda sababta uu endometriosis u saameynayo uur qaadistooda. Hadalada waxaa ka mid ah in endometriosis:

- Uu sababo ukumaha aysan u ekeyn inay bacrimismayaan
- Ku soo saarida sun dabiici ah shahwada.

Meesha aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah

Xarunta Macluumaadka Caafimaadka Dumarka (RWH)

(03) 8345 3045

1800 442 007 (wicitaan bilaash ah) Email: whic@thewomens.org.au

<http://www.thewomens.org.au>

Endometriosis Association of Victoria

567 Waterdale Road

Heidelberg West

Victoria 3081

Australia

(03) 9457 2933

<http://www.endometriosis.org.au/>

Rugta Caafimaadka Dumarka ee Isbitaalka Dumarka ee Royal

Rugta caafimaadku waxay ku taalaa waaxda bukaan socodka ee dabaqa hoose ee

Isbitaalka Dumarka ee Royal

Teleefan 8345 2000

Waraqaha xaqiiqda RWH ee aad faa'iido ka heli kartto

RWH waxay hayaan waraaqo xaqiiqeed fara badan oo afaf badan ku qoran intermeetkana ku jira. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah waxaad geli kartaa website – kayaga xayeysiinta caafimaadka . cinwaanku waa <http://www.thewomens.org.au>

Waxaad sidoo kale weydiin kartaa xannaaneeyahaaga Isbitaalka Dumarka ee Royal inuu ku siiyo nuqul daabacan oo ah waraaqdaas xaqiiqda. weydiiso:

- *Daaweynta Endometriosis*
- *Ku daaweynta Endometriosis Laparoscopy*